GP PATIENT SURVEY

NHS

Lambarka xog qaadista:**1234567890**
Afgaradka Online ka:AAAAA
4 Janaayo 2021

## Fursadaada aad ku caawinayso NHS

Waxaan warqadda kugu soo qorayaa inaan ku weydiiyo inaad ka qeyb qaadato GP Xog qaadista bukaanka GP-ga. Xog qaadistan waxaa fulinaya Ipsos MORI iyaga oo ku matalaya NHS England ugu dhowaan 1 milyan oo dad ah ayaa sannadka naga caawiya ka qayb qaadashada xog qaadista.

## Horumarinta GP iyo adeegyada caafimaad ee aagaaga

Waxay ku weydiinaysaa xograadintu wax ku saabsan wayo-aragnimadda GP-daada qaliinka iyo adeegyada kale ee maxaliga ah ee NHS, waxaana kamid ah su'aalaha ku saabsan adiga iyo caafimaadkaaga guud. Su'aalaha aanu dib u helo waxay caawiyaan NHS si ay u hagiyaan adeegyada maxaliga ah ee caafimaadka sida dadka adiga oo kale iyo qoyskaaga. Guud ahaan laba iyo tobankii bilood ee lasoo dhaafay shaqada GP waxaa lagu sameeyay dhawr isbadal iyada oo laga jawaabayo safmarka COVID-19. Sidaas darteed, waxaa ay iminka kasii muhiimsan tahay sidoo kale in aanu helno macluumaadkaaga waxa aad kala kulantay adeegyada NHS. Xitaa haddii aadan booqanin GP qaliinkaaga dhawaan ama waxaad buuxisay su'aalaha xog qaadisa hadda ka.

Fadlan ka qayb qaado adoo buuxinaya su'aalahan ku lifaaqan ama online gelaya. Waxaa fudud inaad kaga qayb qaadato online NHS.

Buuxi su'aalahan oo dib ugu soo dir bashqada ku lifaaqan. Waa bilaash - uma baahnid faranka bolo. Ama uga qayb qaado online. Gal **www.gpsurvey.net/login** isticmaalna faahfaahinta ku gelitaanka ee hoose:

Lambarka xog qaadista: 1234567890     Afgaradka Online ka: AAAAA

Waxay qaadaneysaa wax ka yar 15 daqiiqo.

**Waxaad naqa caawin kartaa NHS England adoo u buuxinaya xog qaadista sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.** Sidaasna uguma baahan doono inaan kuu soo dirno xusuusino

## Macluumaadkaaga waxaa loola dhaqmi doonaa si sir ah

Waxaa jira macluumaad badan oo xog qaadista oo ku saabsan oo sir ah oo ku yaal bogga sirta ah. Haddii aad qabto su'aalo badan ama aad u baahantahay in laga caawiyo buuxinta su'aalaha xog qaadista, fadlan booqo **www.gp-patient.co.uk**. Ama waxaad wici kartaa

Ipsos MORI ka ah **teleefoonka 0800 819 9146** (Isniin ilaa Jimce, 8 subaxnimo ilaa 9 fiidnimo; Sabti, 10 subaxnimo ilaa 5 galabnimo).

Aad ayaad ugu mahadsantahay in aad bixiso qayb wakhtiga ah si aad u caawiso NHS.

Dacadnimadaada

Neil Churchill
Director of Patient Experience
NHS England

Fadlan rog bogga

## Maxaad u fulinaysaan ra'yi-ururintan?

Ra'yi-aruurintan waxay ka caawin doontaa NHS inay hagaajiso qaliinada GP iyo adeegyada kale ee heer deegaan NHS sidaa darteed waxay si fiican u waafaqi baahiyahaaga. Waxaad arki kartaa dhamaan natiijooyinka ee rayi-aruurintii hore, oy ka mid yihiin natiijooyinka GP qaliinada heer deegaan, ayadoo la booqanayo websaydka ee www.gp-patient.co.uk.

## Sideed ku heshay macluumaadkayga xidhiidhka?

Magacaaga waxa looga doortay si bakhtiyaa nasiib ah liiska NHS bukaanka ka diiwaan gashan GP. Si waafaqsan General Data Protection Regulation iyo Data Protection Act 2018, anaga oo ku sugan NHS England waxaanu ka masuul nahay (sidii 'maamulayaasha xogta').ee macluumaadka aanu adiga kaa hayno Ipsos MORI waa 'habeeyaha xogta' oo na metelaya anaga si uu u fuliyo xog ururinta.

Ipsos MORI waxay u hayn doontaa **magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka iyo lambarka NHS qarsoodi** oo keliya u isticmaali doontaa inay kuu soo dirto adiga xog qaadistan. Ipsos MORI lama siin wax macluumaad ah oo ku saabsan caafimaadkaaga. **Waxa laguusoo diri doonaa fariimo qoraal ah oo lagugu xasuusinayo GP_Survey iyada oo la isticmaalayo lambarka taleefanka.** Waxaa taas kamid ah link-ga gaarka ah eek a qayb qaadashada online-ka ah – uma baahdin inaad geliso macluumaadka aad ku gasho si aad u gasho. Marka xog uruurintu ay dhammaato, Ipsos MORI waxay burburin doontaa faahfaahintaada xidhiidhka.

NHS England ogaysiiska gaar ahaanshaha waxa uu sharaxaa sida aad adigu ula xidhiidhi karto iyo xuquuqhaaga ku saabsan sida macluumaadkaaga loo isticmaalo. Waxaad ka arki doontaa ogaysiiska bogga www.england.nhs.uk/contact-us/privacy-notice.

## Maxaa ku dhacaya jawaabahayga?

Jawaabahaaga waxaa lagu wada daraa jawaabaha dadka kale si loo siiyo natiijooyinka goobtaada GP iyo aaga maxaliga ah, si loo soo saaro natiijooyinka qaranka. Kuma xidhna magacaaga, cinwaankaaga, lambarka taleefanka ama lambarka NHS. Jawaabahaaga waxaa qarsoodi u hayn doonta Ipsos MORI, iyo ka la ansixiyay ee NHS England shaqaalaha iyo cilmi baadhayaasha. Cidna ma aqoonsan doonto adiga natiijooyin kasta oo la daabaco. Wixii macluumaadka dheeraad ah booqo **www.gp-patient.co.uk/confidentiality.**

## Waa maxay lambarka rayi-aruurinta ee bogga hore ee warqaddan loo adeegsaday?

Ipsos MORI waxay adeegsana lambarka rayi-aruurinta si loo garto cidda ka jawaabtay rayi-aruurinta (sidaa darteed waxay kali ah oo ay u diri warqado xasuusin ah dadka aan ka jawaabin) iyo inay isku xiraan jawaabaha ee qaliinka GP. Lambarka rayi-aruurinta lagu dhajin maayo lambarkaaga NHS. Haddii aadan rabin inaad hesho wax xasuusin oo ku saabsan rayi-aruurinta, fadlan soo celi warqadda su'aalaha oo banaan ama kala xiriir Ipsos MORI taleefanka bilaashka **0800 819 9146**.

## Qof ma iga caawin karaa buuxinta foomka su'aalaha?

Haa, taasi waa sax. Waxaad la soo xiriiri kartaa kooxdayada ama ka codso saaxiib ama qaraabo inay ku caawiyaan, laakiin fadlan hubi in jawaabuhu ay yihiin oo kali ah wax ku saabsan waxa aad ogtahay adigu.

# Haddii aad rabto koobi su'aalahan, far waaweyn ama Farta-Indhoolaha, wac taleefanka bilaashka ah 0800 819 9146.